IIB MA GALO

FAAFINTA RASMIGA AH

الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 10aad Muqdisho 25 Okt. 1982 Lr. 2 r 10

FAAHFAAHINTA BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J. D S.

QIIMADU: waa 5 shilin tandar waliba — RUKUNKA: Sannadii waa Sh 100

Somaaliya gudaheeda — dibaddeedana waa Shs 300 Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Jenayo Qiimaha qoritaanku F.R. balkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanka waxaa la weydiistaa laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda lacagta

K O O B N I I N

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 31/bjs ee 2 Sebt. 1982, Ansixinta Sharciga Xuquuqda Dadka Ciidama da Qalabka sida ka tirsan ee la waree jiyey Bogga 954

SHARCI L. 32 ee 2 Oktoobar 1982, Oggolaansho heshiis amaah dhexmaray JDS iyo Sanduuqa Carabta ee Horumarinta Dhaqaalaha iyo Bulshada, kuna saabsan maalgelinta Mashruuca ballaarinta Korontada Xamar. » 955

SHARCI L. 33 ee9 Okt. 1982, Oggolaansho heshiis amaah ee dhexmaray JDS iyo dhawr Banki kuna saabsan Warshadda Shamiintada Berbera. » 957

SHARCI L. 34 ee 12 Okt. 1982, Ansixinta Sharciyada la soo saaray 1.1.1982 ilaa iyo 9.8.1982 » 958

SHARCI L. 35 ee 19 Okt. 1982, Oggolansho Meelmarin heshiis amaah oo dhexmar JDS, iyo Sanduuqa Horumarinta Caa lamiga ah ee OPEC, looguna tala galay taageeradda dheelitirka Xisaabaa dka Dibadda. » 961

QAYBTA LABAAD

X E E R

XEER SHARCI L. 5 ee 13 Okt. 1982, ku saabsan wax ka beddelka tacriifada Furdada. » 963

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 51 ee 2 Okt. 1982, Meelmarinta heshiiska dhexmaray JDS iyo Sanduuqa Carabta ee Harumarinta Dhaqaalaha iyo Bulshada, kuna saabsan Maalgelinta Mashruuca ballaarinta Kor. Xamar. » 964

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 52 ee 13 Okt. 1982, Nidaamka Beddelidda Aqoonsiga, Shahaadooyinka Billadaha » 966

وثيقـــــة التصـــــديق : ٩٦٨
مرسوم جمهورى رقم ٥١ بتاريخ ٢ — ١٠ — ١٩٨٢م

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 53 ee 9 Okt. 1982, Meelmarinta Heshiiska amaaheed ee dhexmaray JDS iyo Bankiyo Faransiis ah kuna saabsan maal gelinta Warshadda Shamiindada Berbeera. » 969

DECREE No. 53th 9 Okt. 1982, Instrument of Rafication. » 970

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 54 ee 9 Feb. 1982, Ruqso Sarkaal. » 971

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 55 ee 23 Feb. 1982, Dallacaad Saraakiileed. » 972

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 56 ee 19 Okt. 1982, Meelmarin Heshiiska amaaheed ee dhexmaray JDS iyo San duuqa Horumarinta Caalamiga ah ee OPEC. » 973

DECREE ..... .JDS, N. 56 on 19 th Okt. 1982, Instrument of Rati fication. » 974

Maxkamadda Gobolka Togdheer, 3.8.82, Lumid Buug Kayd L. 3308/7 ku qoran Jibriil Maxamed Axmed

Maxkamadda Gobolka Togdheer, 21.10.82, Lumid Jeegga Wareega L. 66322,00 ku qoran Axmed Nuur Xaashi

SAXID QALAD

FAAFINTA RASMIGA AH L. YAHAY 2 r8

ee30 Agoosto 82, Bogga Lam. 692, Go' aanka Maxkamadda Gobolka Hiiraan Wareega L. yahay 252461.
Waa in loo akhriyaa sida hoos ku qoran.
Jeeg Wareega Lamb. 251461.

QAYBTA KOWAAD

S H A R C I

Sharci L. 31 taariikh 2 Set. 82, ansaxin Sharciga Xuquuqda Dadka Ciidamada Qalabka sida ka tirsan ee la wareejiyay.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAYA: Oggolaanshaha Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

(Ansixin)

1. Waxaa la ansixiyay Sharciga Lambar 19 ee 26.5.82, kuna saabsan Xuquuqda Dadka Ciidamada Qalabka sida ka tirsan ee la wareejiyay, qodobadiisa 1ad, 3aad, 4aad, iyo 5aad.

2. Ansixinta qodobada kor ku xusan waxay ka bilaabanaysaa maalinta uu dhaqan galay isla Sharcigan Kor ku xusan.

Qod. 2aad

(Beddelaad)

Qodobka 2aad ee Sharciga kor ku tilmaaman, waxaa loo bedelay sida soo socota:

Laga bilaao taariikhda wareejinta, xubnaha Ciidamada Qalabka sila ee la wareejiyay waxay ka mid noqonayaan Shaqaalaha Qaranka ee Rayadka ah, waxayna la soo wareegayaan xuquuqda u bislaatay muddaday ka tirsanaayeen Ciidamada.

Qod. 3aal

(Dhaqangal)

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa laga bilaabo marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 2 Set. 1982

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

Sharci Lambar 32 taariikh 2 Ott. 1982 oggolaansho heshiis amaah dhexmaray J.D.S. iyo Sanduuqa Carab ta ee Horumarinta Dhaqaalaha iyo Bulshada, kuna saabsan Maalgelinta Mashruuca ballaarinta Koronta da Xamar.

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

MADAXWEYNAHA JDS

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday meelmarinta heshiiskā dhex maray J.D.S. Iyo Sanduuqa Carabta ee Horumarin ta Dhaqaalaha iyo Bulshada, kuna saabsan amaah Lacageed oo dhan 2.000.000 (Laba Malyan) Dii naarka Kuweyt oo loogu talo galay Mashruuca Bal laaranta Korontada Xamar.
2. Heshiiska waxaa lagu kala saxiixday magaalada Kuweyt, taariikhdu markay ahayd 27.4.1982.

3. Heshiisku wuxuu ka mid yahay Sharcigan isagoo lifaaq u ah

Qod. 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha ay tilmaamayaan qodob bada heshiiska ku tilmaaman qod. 1aad ee Sharcigan waxay leeyihiin qiimo iyo astaan sharci la heer ah sha rciyada iyo xeerarka Dalka, waxaana dhaqangelntooda la waafajinayaa Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraa diga Soomaaliya iyo Heshiiska.

Qod. 3aal

Madaxweynaha J.D.S. Waxaa awood loo siiyey inuu meelmariyo Heshiiska Sharcigan ku tilmaaman.

Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 2 Ott. 1982

MADAXWEYNAHA J.D.S.

(Maxamed Siyaad Barre)

Sharci Lambar 33 taariikh Oggolaansho Heshiis Amaah ee dhexmaray J.D.S. iyo dhawr Banki, kuna saabsan Warshadda Shamiintada Berbara.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAYO: Oggolaansho Guddiga Joo gtada ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday meelmarinta Heshiiska dhex maray J.D.S. iyo dhawr Banki. Banque De l'union Eurofenna iyo Banque Francaise Ducommerce Exteriour, kuna saabsan amaah Lacageed ayna dhaafeyn FRF 58.500.000, oo loogu tala galay Warshadda Shamiintada Berbera.

2. Heshiiska waxaa lagu kala saxiiday magaalada Mu qdisho taariikhdu markay ahayd 27.9.1981.

3. Heshiisku wuxuu ka mid yahay Sharcigan isagoo lifaaq u ah.

Qod. 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan qodobada heshiiska ku tilmaaman qodobka 1aad ee sharcigan wa xay leeyihiin qiimo iyo astaan sharci la heer ah Sharci yada iyo Xeerarka Dalka, waxaana dhaqan gelntooda la waafajinayaa Dastuurka J.D.S. Iyo heshiiska.

Qod. 3aal

Madaxweynaha J.D.S. Waxaa awood loo siiyey inuu meelmariyo heshiiska Sharcigan lagu tilmaamay.

Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saara yaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 9 Ott. 1982

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

Sharci Lambar 34 taariikh Ansixin Sharciyada la soo saaray 1.1.1982 ilaa iyo 9.8.1982.—

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELIYEY: Cggolaanshaha Golaha Sha cbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad
A N S I X I N

Waxaa la ansixiyey Sharciyada soo socda:

1. Sharci Lambar 2 ee 12.1.82: Heshiis amaah oo dhe xmaray J.D.S. iyo Sanduuqa Carbeed ee Horumari nta Dhaqaalaha iyo Bulshada, kuna saabsan «Ma shruuca Isgaarsiinta».—

2. Sharci Lambar 3 ee 23.2.82: U rogid Sharci «Xeer Sharci» Lam. 1 ee 28.1.82, kuna saabsan Cafis guud oo loo fidiyey Dambiilayaal iyo Eedeysanayaal Dal ka Dibadiisa jiray iyo kuwa Caalaladda ka dhuu maaleysanaayo.—

3. Sharci Lambar 4 ee 23.2.82: U rogid Sharci «Xeer Sharci» Lam. 2 ee 28.1.82, kuna saabsan baabi'inta Canshuuraha aan caadiga ahayn ee Horumarinta Dhaqaalaha iyo Bulshada iyo dhimista Mushahara da iyo Gunnada Shaqaalaha Dawladda.—

4. Sharci Lambar 9 ee 2.3.82: Heshiis amaah ee dhe xmaray J.D.S. Iyo Keydka Horumarinta Afrika, ku na saabsan Kharajka Lacagta Qalaad ee Mashruu ca Waraabka Afgooye Moordiinle (qaybta 2aad).—

5. Sharci Lambar 10 ee 2.3.82: Heshiis amaah ee dhe xmaray J.D.S. Iyo Sanduuqa Lacagta Carbeed, loo guna tala galay in lagu daboolo Cajsi Miisaaniya deed.—

6. Sharci Lambar 11 ee 2.3.82: Heshiis amaah oo dhe xmaray J.D.S. Iyo Sanduuqa Lacagta Carbeed, loo guna tala galay dheelitirka wax ku bixinta Lacag ta Qalaad.—

7. Sharci Lambar 12 ee 11.4.82: Heshiis dhexmaray J.D.S. Iyo Dawwladda Ciraaq, kuna saabsan Iskaa shiga Dhaqanka, Culuunta, Fanka iyo Teknolojiya da.—

8. Sharci Lambar 14 ee 5.5.82: Heshiis lagu aasaas ay Machadka Maamulka Shaqaalaha Gobolka Afri ka oo ku hadla Afka Ingiriiska.—

9. Sharci Lambar 15 ee 13.6.82: Dhismaha Mashruu ca Waraabinta Mogaambo.—

10. Sharci Lambar 16 ee 13.5.82: Heshiis dhexmaray J.D.S. Iyo Dawladda Imaaraadka Carabta ee Midoo bey (U.A.E.), kuna saabsan Iskaashiga xagga Qaa nuunka iyo Garsoorka.—

11. Sharci Lambar 17 ee 26.5.82: Heshiis amaah oo dhexmaray J.D.S. Iyo Sanduuqa Kuweyt ee Horu marinta Dhaqaalaha Carabta, kuna saabsan Mash ruuca Kordhinta Korontada Xamar.

12. Sharci Lambar 18 ee 26.5.82: Heshiis amaah oo dhexmaray J.D.S. Iyo Sanduuqa Carabta ee Horu marinta Dhaqaalaha iyo Bulshada, kuna saabsan Maalgelinta Mashruuca Biyaha Xamar.

13. Sharci Lambar 19 ee 26.5.82: Xuquuqda Dadka Ciidamada Qalabka sida laga soo wareejiyay.—

14. Sharci Lambar 22 ee 26.5.82: U rogid Sharci «Xeer Sharci» Lam. 29 ee 28.4.82, kuna saabsan dhi smaha Wasaaradda Dooxada Juba.—

15. Sharci Lambar 21 ee 20.6.82: Heshiis lagu abuu rayo Beesha Ganacsiga Bariga iyo Koonfurta Afri ka.—

16. Sharci Lambar 22 ee 4.7.82: Heshiis amaah oo dhexmaray J.D.S. Iyo (IDA), kuna saabsan Mash ruuca Biyaha Xamar.—

17. Sharci Lambar 23 ee 4.7.82: Sharci wax ku kor dhinaaya waxna ka bedelaya Xeerka Nidaamka Garsoorka Lam. 34 ee 22.8.1974, qodobkiisa 23aad iyo 32aad.—

18. Sharci Lambar 24 ee 4.7.82: Dhismaha Guddiga Xisaabi Xil ma leh.—

19. Sharci Lambar 25 ee 12.7.82: Heshiis amaah oo dhexmaray J.D.S. Iyo Sanduuqa Carabta ee horu marinta dhaqaalaha iyo Bulshada, kuna saabsan Dhismaha Jidka Golweyn Jilib.—

20. Sharci Lambar 27 ee 9.8.82: Dhismaha Guddiga Difaaca iyo Nabadgelyada.—

Qod. 2aad

(Dhaqan galka)

Ansixintaan waxay dhaqan geleysaa laga bilaabo 10 Agoosto 1982, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda—

Muqdisho, 12 Ott. 1982

MADAXWEYNAHA J.D.S.

(Maxamed Siyaad Barre)

Sharci Lambar 35 taariikh 19 Okt. 1982 oggolaansho meelmarinta heshiis amaah oo dhexmaray J.D.S. Iyo Sanduuqa Horumarinta Caalamiga ah ee OPEG, looguna tala galay taageeridda dheelitirka Xisaabaadka Dibadda.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELIYEY: Oggolaansha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.—

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday meelmarinta heshiiska dhexmaray J.D.S. Iyo Sanduuqa Horumarinta Caalamiga ah ee OPEG, kuna saabsan amaah Lacageed oo gaaraysa 9.000.000/= Doolarka Maraykanka, looguna tala galay taageerada dheelitirka Xisaabaadka Dibadda.—

2. Heshiiska waxaa lagu kala saxiixday magaalada Vienna, taariikhdu markay ahayd 15.7.1982.

3. Heshiisku wuxuu ka mid y ahay sharcigan isagoo lifaaq u ah.

(Qod. 2aad)

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan qodobada heshiiska ku tilmaaman qodobka 1aad ee sharcigan waxay leeyihiin qiimo iyo astaan sharci la heer ah sharciyada iyo xeerarka dalka, waxaana dhaqan gelin tooda la waafajinayaa Dastuurka J.D.S. iyo Heshiiska.

Qod. 3aal

Madaxweynaha J.D.S. Waxaa awood loo siiyay inuu meelmariyo heshiiska Sharcigan lagu tilmaamay.

Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Malaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 19 Ott. 1982

MADAXWEYNAHA J.D.S.

(Maxamed Siyaad Barre)

XEER Sharci Lr. 5 ee 13 Okt. 1982 kuna saabsan wax ka bellelid tacriifala Furdada.

MADAXWEYNAHA JDS

ASAGOO ARKAY: Qodobka 69aad ee Dastuurka JDS,

ASAGOO ARKAY: Sharciga Lr. 5aad ee 11.12.68 kuna saabsan tacriifada Furdada iyo isbeddeladii ka dambeeyey.

ASAGOO GARAWSADAY: Lagama maarmaannimada in wax laga beddelo tacriifada Furdada. Daryeelid maceeshadda Shacbiga awgeed.

ASAGOO DHEGEYSTAY: Golaha Wasiirada.

IYADOO UU SOO JEEDIYEY: Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda.

WUXUU SOO SAARAY XEER-SHARCIGAN

Qod. 1aad

Saliidda la cuno oo hoos timaada codadka tacriifada Furdada 15.07/01 ilaa 20 waxaa lagu cashuurayaa 4% oo ah Dazio Fiscale mana la saarayo Dazio Doganale.

Sidaas oo kale burka oo hoos yimaada codadka tacriifada 11.01/01 ilaa 10 waxaa lagu cashuurayaa sida faqrada sare.

Qod. 2aad

Sharci kasta ee ka soo horjeeda ama aan la socon karin Xeer-Sharcigan waa la burriyey.

Qod. 3aal

Xeer-Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa markii uu saxiixo Madaxweynaha J. D. S. waana in loo gudbiyo Golaha Shacbiga si uu u rasmiyeeyo.

Muqdisho, 13 Oct. 1992

MADAXWEYNAHA J.D.S.

(Maxamed Siyaad Barre)

QAYBTA LABAAD

XEER

XEERKA MADAXWEYNAHA JDS, lambar 51 taariikh 2 Okt. 1982, Meelmarin heshiis dhexmaray JDS iyo Sanduuqa Carabta ee Horumarinta Dhaqaalaha iyo Bulshada, kuna saabsan Maalgelinta Mashruuca ballaarinta Korontada Xamar.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Qod. 67, faqradda 5aad, iyo Qod. 82aad, faqradda 4aad, ee Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 32, taariikh 2.10.82, oo Goluhu Shacbigu ku oggolaaday heshiisa ujeedada ku tilmaaman;

MARKUU ARKAY: Inay lagama maarmaan tahay in heshiiskaas la meel-mariyo;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

(Qod. 1aad)

Waxaa la meelmariyay heshiis amaaheed oo ku dhexmaray Magaalada Kuweyt taariikhdu markay ahayd 27.4.1982, JDS iyo Sanduuqa Carabta ee Horumarinta Dhaqaalaha iyo Bulshada, kuna saabsan Maalgelinta Mashruuca ballaarinta Korontada Xamar.

Qod. 2aad

Heshiisku wuxuu ku yeelan doonaa JDS astaan sharci ah, dhaqangelkiisuna wuxuu billaabanayaa marka la IS WEYDAARSADO WARAAQAHA MEELMARINTA, IYADOO la raacayo habka ku tilmaaman Qod. 8aad ee Heshiiskan.

Qod. 3aal

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 2 Ott. 1x82

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 52 ee 13 Okt. 1982,

Nidaamka beddelidda Aqoonsiyada, Shahaadooyinka Billadaha iyo Billadaha.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Sharciga lam. 65 ee 19ka Oktoobar 1970kii, kuna saabsan Abaalmarinta caadiga ah;

MARKUU AQOONSADAY: Inay lagama maarmaan tahay in uu dejiyo nidaam saameeya beddelidda aqoonsiyada billadaha, Shahaadooyinka billadaha iyo dib u bixinta billadaha luma ama duugoobay;

MARKUU TIXGELIYEY: Talada Guddiga Abaalmarinta MJDS.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

1. Beddelidda aqoonsiga billadaha, Shahaadooyinka billadaha iyo bixinta billadaha cusub ee beddelka ah waxaa xaq u leh oo keliya qofkii mar hore Abaalmarin la siiyey.

2. Dib u bixinta Dokumentooyinka kor ku xusan iyo billadaha beddelka ah waxaa lagu dhaqayaa shuruudaha Xeerkan ku tilmaaman kuwa u gaarka ah Abaalmarin kasta.

Qod. 2aad

Qofka ay ka lunto ama ay ka duugowdo aqoonsiga billadda, Shahaaddada billadda ama billadda, doonayana in dib loo siiyo kuwo cusub, waa inuu soo gaarsiiyo Guddiga Abaalmarinta M.J.D.S:

Qod. 4aad

b) Caddeynta Abaalmarinta.
t) Laba sawir (haddii aqoonsi billadeed ka lumo ama ka duugoobo).

j) Aqoonsiga duugoobay ama Shahaadada duugoowday.

x) Qiimaha aqoonsiga billadda, Shahaadada billadda ama billadda cusub.

Qod. 3aad

Cddeynta Abaalmarinta ku xusan qod. 2aad (xarafka b), waxaa loola jeedaa caddeemada hoos ku xusan oo isku lifaaqan;

1. Caddeynta qofka abaalmarinta ka luntay.
2. Caddeynta Hay,adda Xisbiga Urur Bulsho, iyo Ciidammada uu ku sugan yahay, (goob deegaan, goob shaqo ama goob waxbarasho).

Qod. 4aad

Si loo baabi'iyo lambarrada aqoonsiyada luma, dibna loogu faa'iideymar, Xaghaynta Guddiga Abaalmarinta MJDS, waxay u kala dhoysaa lambarradaas meelaha soo socda, si ay u baaraan, tallaabana uga qaadaan:

1. Shineemooyinka (goobta tigidka).
2. Goobaha Ciyaaraha (Isbortiga).
3. Golayaasha Hiddaha iyo dhaqanka.
4. Xafiisyada Tikidka Gaadiidka: Cirka, Badda iyo dhulka.
5. Xafiiska Degmada oo qofku deggan yahay.

Qod. 5aad

Lacagta ka soo gasha aqoonsiyada, Shahaadooyinka billadaha iyo billadaha oo ku xusan qod.2aad xarafka (x) ee Xeerkan waxaa lagu shubayaa khasnadda dhexe ee Dawladda.

Qod. 6aad

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee JDS.

Muqdisho, 13 Okt. 1982

MADAXWEYNAHA J.D.S.

(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

وثيقـــة التصـــديق :

مرسوم جمهورى رقم ٥١ بتاريخ ٢ — ١٠ — ١٩٨٢م

رئيس جمهورية الصومال الديمقراطية

بعد الاطـلاع على المادة ٦٧ القفرة الخامسة والمادة ٨٢الفقرة الرابعة من دستور جمهورية الصومال الديمقراطية.

بعد الاطـلاع على اتفاقية القرض بين حكومة جمهورية الصـومال الديمقراطية والصندوق العربى للانماء الاقتصـادى والاجتماعى للمساهمة فى تمويل مشروع كهربـاء مقديشو الموقع عليهـا فى الكويـت بتاريـخ ٢٧ مـن شهـر أبريـل ١٩٨٢م .

وبعد الاطـلاع على القانون رقم ٣٢ بتاريـخ ٢ — ١٠ — ١٩٨٢م الخاص بموافقة مجلس الشعب على الاتفاقية .

يصدر المرسوم التالى :

المادة الاولى :

تم التصديق على اتفاقيةالقرض المبرمة بين جمهورية الصومالالديمقراطية والصندوق العربى للانماء الاقتصادل والاجتماعى للمساهمة فى تمويـل مشروعكهرباء مقديشوالموقعءليها فىالكويتبتاريخ٢٧منشهرأبريل١٩٨٢م.

المادة الثانيـة :

تكوين الاتفاقية قوة القانون فى جمهورية الصومال الديمقراطيـة ويعمل بها وفقا للمادة الثامنـة من الاتفاقيـة.

المادة الثالثـة :

وينفذ هذا المرسوم حال توقيعهمنقبل رئيس جمهورية الصومـال الديمقراطية وينشر فى الجريدة الرسميـة للدولة .

مقديشـو ، فـى ٢ — ١٠ — ١٩٨٢م

محمد سياد بـرى
رئيس جمهورية الصومال الديمقراطية

XEERKA MADAXWEYNAHA JDS, lambar 53, taariikh 9 Okt. 1982, Meelmarinta Heshiiska amaaheed ee dhexmaray JDS iyo Bankiyo Faransiis ah, kuna bera.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Qod. 67aad, faqradda 5aad, iyo Qod. 82aad, faqradda 4aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga tirsigiisu yahay——— ——— taariikh ———————— oo Golaha Shacbiga ku oggolaaday Heshiiska Xeerkan ku tilmaaman;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarman tahay in heshiiskaas la meelmariyo;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la meelmariyey heshiiska amaaheed ee dhexmaray JDS, iyo BANQUE DE L'UNION EUROPENNE iyo BANQUE FRANCAISE DU COMMERCE EXTERIEUR oo lagu kala saxiixday magaalada Muqdisho, 27kii September 1981, kuna saabsan amaah lacageed oo loogu talo galay Warshadda Shamiintada Berbera.

Qod. 2aad

Heshiiskan wuxuu ku yeelanayaa JDS astaan sharci ah, dhaqangalkiisuna wuxuu ka billaabanayaa maalinta heshiiska la kala saxiixday, sida uu qabo Qod. 21aad ee Heshiiska.

Qod. 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 9 Okt. 1982

DECREE No. 53 on 9th Ottober 1982, INSTRUMENT OF RETIFICATION.

HAVINC SEEN: Article 67 (5) cod Article ٤٤ (4) of the Comstitution of S.D.R.

HAVINC SEEN: The law N. ٤٣ of 9 Okt. 1982 on the bace of which the Peoplce Assemhly has appooyel the agreement specified in this Decree.

HAVING CONSIDERD: The necessity to ractify Cis Agrecement.

HEREBY PROMULGATES

The following Deeree:

Article 1

The credit agreoment betwemn Somali Democcratis and Banque De l'Union Europenne and Banque Francaise Du Commerce Exterieur, signed at Mogadishu on 27the September 1981, for financing Berbera Cement Industry IS HEREBY RATIFIED:

Article II

This Agreement shall have the force of law in the territory of Somali Democratic Republic, it's implementation will effect from the day of signatury, in acoordance with Article 21 of the Agreement.

Article III

This Decree shall come into forco upon signiture by the President of SDR, and shall be publish in the Official Bulletin of the Republic

Mogadishu, 9 Ott 1982

PRESIDENT OF SDR

(Mohamed Siad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 54 ee 9 Feb. 1982, Ruqso Sarkaal.

MADAXWEYNAHA

ISAGOO ARKAY: Dastuurka J.D.S. Qod. 82aad.

ISAGOO ARKAY: Sharciga Lambar 2 ee 23.12.1972kii oo ku saabsan dhismaha Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed.

ISAGOO ARKAY: Sharciga Lambar 6 ee 31.12.1969kii ee saameeya xaqa iyo Gunnada Ciidamada Qalabka sida (Pension and gratuity).

ISAGOO TIXGELIYEY: Talada uu soo jeediyey Taliyaha Ciidanka Bolliiska Soomaaliyeed ee ku qoran Xaashidiisa Lambar CIID/A/12/ ee 22.1.1982 iyo Arjiga Sarkaalkl ku codsanayey in Shaqada Ciidanka iskiis looga ruqseeyo ee ku lifaaqnaa.

WUXUU XEERAY:

Qod 1aad

In Xiddigle Axmed Xaaji Cusmaan Xuseen oo ka tirsan Ciidanka Bolliiska Shaqada Ciidanka looga ruqseeyo iskiis marka laga bilaabo 15.2.1982.

Qod. 2aad

In Sarkaal la siiyo wixii xaq ah ee uu siinayo Sharcigu.

Qod. 3aad

Xeerkaan deg deg buu u dhaqan gelayaa, waxana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawlada

Muqdisho, 9.2.1982.

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(S. Gaas Maxamed Siyaad Barre)

Waan aragnay oo Dhwaangelinay.
Dhwaanka L. 2 Bog: L. 25.
Muqdisho, 7 Marso 1982.
Hantidhowraha Guud,
Dr. Xuseen Cabdulle Cali.

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 55 ee 23 Feb. 1982 Dallacaad Saraakiileed.

MADAXTÓOYADA J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Dastuurka J.D.S. Qod. 82aad.

ISAGOO ARKAY: Sharciga Lambar 2 ee 23.12.1972 ee ku saabsan Dhismaha Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed,

ISAGOO TIXGELIYEY: Taladii uu soo jeediyey Taliyaha Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed ee ku qornayd Xaashida XOG/A/8/1/82 ee 23.2.1982ka.

WUXUU XEERAY:

Qod 1aad

In Saraakiisha hoos ku qoran oo ka tirsan Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed loo dallacsiiyo derejada mid kasta magaciisa ku hor qoran marka laga bilaabo 16.2.82 taasoo ay ku muteysteen hawl karnimo iyo dadaal dheeraad ah oo ay muujiyeen.

1. X/le Cabdullaahi Abuukar Cismaan L/Xiddigle
2. X le Ibraahim Maxamed Cali L/Xiddigle
3. X le Batar Maxamed Aadan L/Xiddigle

Qod. 2aad

Xeerkani deg deg buu u dhaqan gelayaa waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 23.2.82.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

(S Gaas Maxamed Siyaad Barre)

Waan araguay ee Diiwaangelinay
Diiwaanka lamb 2 bogga lamb. 11.
Muqdisho, 7 Mar. 1982.
Hantidhowraha Guud,
Dr. Xuseen Cabdulle Cali.

Xeerka Madaxweynaha JDS, Lambar 56 taariikh 19 Okt. 1982 meelmarinta heshiiska amaaheed ee dhexmaray JDS iyo Sanduuqa horumarinta Caalamiga ah ee OPEC;

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 67aad, Faqradda 5aad iyo Qod. 82aad, Faqradda 4aad ee Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Sharciga tirsigiisu yahay, taariikh oo Golaha Shacbiga ku oggolaaday heshiiska Xeerkan ku tilmaaman.

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in heshiiskaas la meelmariyo.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod 1aad

Waxaa la meelmariyey Heshiiska amaaheed ee dhexmaray JDS iyo Sanduuqa Horumarinta Caalamiga ah ee OPEG oo loogu talo galay dheellitirka Xisaabaadka Dibadda, heshiiskaasoo lagu kala saxiixday magaalada VIENNA, taariikhdu markay ahayd 15.7.1982.

Qod. 2aad

Heshiiskan wuxuu dalka J.D.S. ku yeelanayaa astaan Sharci ah, wuxuuna dhaqan gelayaa marka Sanduuqa Horumarinta Caalamiga ah ee OPEG loo gudbiyo qoraallada ku tilmaaman Qod. 5aad ee Mashruuca.

Qod. 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 19 Ott. 1982

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

DECREE No. 56 Date 19 Okt. 1982, INSTRUMENT OF RETIFICATION.—

Having Seen: Article 67 (5) and Article 82 (4) of the Constitution of S.D.R.

Having Seen: The law No 35 of 19.10.82 on the base of which the Peoples Assembly has approved the Agreement specified in this Deeree,

Having considered: The necessity to ractify this Agreement.

HEREBY PRONULGATES

The Following decree:

Article I

The loan agreement regarding on Balance of payments support between the Somali Democratic Republic and the OPEC fund for International Development, signed at Vienna on 15 July, 1982, IS HEREBY RATIFIED.

Article II

The agreement shall have force of law in the territory of the Somali Democratic Republic, and ahall become effective upon dispatch to the OPEC fund for international Development the requirements specific on Article 5 of the agreement.

Article III

This Deeree shall come into force upon signiture by the president of SDR, and shall be published in the Official Bulletin of the Republic.

Muqdisho, 19 Ott. 1982

PRESIDENT OF S.D.R.
(Mohamed Siad Barre)

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER

GUDDOOMIYAHA M. G. TOG.

IYADOO UU ARKAY: Dacwadda ku saabsan caddeyn Jeegag Lumay;

HADDUU ARKAY: Ogeysiinta Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Burco;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 D. L. 9.9.65 N.2 Lumidda Jeegagga Wareega (Circural Cheques). ee Lambaradoodu kala yihiin :- J. L. 663252, J. L. 663253 J.L. 663254, kuna qoran yahay AXMED NUUR XAASHI FAARAX, ayna ku qoran tahay Jeegaggaasi Lacagta kala ah, 20.000/sh. So, 20 000/Sh.So. iyo 9.940/-Sh.So.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusbooneysiiyo Jeegagga Wareega ee kor ku xusan Jaalle Axmed Nuur Xaashi Faarax, Markii ay ka soo wareegto muddo dhan 15 maalmood, laguna Sharciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In Jeegagga cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro Axmed Nuur Xaashi Faarax. Iyadoo la sugayo muddada kor ku qoran.

Burco, 12.10.82

GUDDOOMIYAHA MAX. G. TOG. BURCO

(Dr. Cabduraxmaan Sheekh Maxamed)

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER
GUDDOOMIYAHA M. G. TOG.

MARKUU ARKAY: Dacwadda L.Y. 91/82 ee uu sheeganayo Jaalle Jibriil Maxamed Axmed in uu Lumay Buugga L.Y.3308/7 oo uu ka Qaatay Bankiga Ganacsiga Laanta Burco kuna qorantahay Lacag dhan Sh.So. 42000/= uu codsadayna in la siiyo Buugga Lumay;

MARKUU ARKAY: Baafinta Baanka Taa/kh 30.3.82.

MARKUU ARKAY: Codsiga Baanka G. Laanta Burco Taariikh 29.7.82 ee uu codsanaayo Amarto in Lumista Buugga lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah, si loo cusbooneysiiyo Buugga Ninkii lahaa;

MARKUU ARKAY: Qod.65.D.L. Del 9.9.65.

In lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah Buugga L.Y.3308/7 oo ay ku qorantahay lacag dhan 42000/= haddii cid kale sheegan waydo 30 cisho gudahood. Ha loo cusgooneysiiyo Buugga gacanta halaga saaro Jaalle JIBRIIL MAXAMED AXMED, oo ah Ninka uu ka lumay Buugga.

Burco, 3.8.82

GUDDOOMIYAHA MAX. G. TOG. BURCO
((Dr. Dayib Sh. Abuukar) Gacanweyne